

# Wargeyska Mountain View

## Janaayo 27, 2016

Arbaco, Janaayo 27.....Shirarka Waalidka/Macalinka, 3:10-7:00 p.m.  
Qamiis, Janaayo 28.....Shirarka Waalidka/Macalinka, 12:40-7:00 p.m.  
Qamiis, Janaayo 28.....Ka Tagidda Dugsiga 12:40 p.m.  
Jimco, Janaayo 29.....Ka Tagidda Dugsiga 12:40 p.m.  
Talaado, Febraayo 2.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha 8:15 a.m.  
Qamiis, Febraayo 4.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:15 p.m.

### Fariinta Agaasimaha

Todobaadkaan ardaydena waxay ka qeybgeli doonaan Taxadiga Naxariista Sare (Great Kindness Challenge). Arday kasta waxaa la siiyay warqad ku saabsan hawlaha suurtoogalka ah ay samayn karaan si ay u muujiyaan naxariis. Cunug kasta oo sameeyo labaan iyo shan hawl oo ku jira liiska waxaa la siin doonaa jijinta farxadda. Jijinta waxaa ka muhiimsan fikradda in naxariista na dareensiiso wanaag, taasoo dugsigena iyo bulshadana ka dhigto meel sare oo la joogo. Waxaan dhamaan haysanaa fursad aan ku wanaajino bulshadana anaga oo ku shaqeyno naxariis, kaddibna isbaddal u samayno dadka kale. Waxaan waalidiinta ku soo dhaweyneynaa in ay caruurtooda ku kaalmeyaan dhamaystirka hawlaha farxadda iyo in ay caruurtooda ku kaalmeyaan in ay ogaadaan naxariista ay leeyahiin.

### Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, in ay kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maalinta Talaadada, Febraayo 2, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

### Safarada Dibadda

Safarada dibadda waxaa qorsheya macalimiinta, waxaana loo sameyay in lagu kobciyo manhajka. Waalidiinta waxaa horay loogu sheegi doonaa safarka lagu tago dibadda ee la ballamiyay, iyo waxaa la siin doonaa tafaasiil sida goobta, waqtiyada bixidda iyo soo noqoshada, iyo macluumaad kale oo khaas ah. Macalimiinta waxay soo dhaweyaan in waalidiinta ka soo qeybgasho safarada dibadda, hase ahaatee waxay kaa codsadaan in aadan caruur yaryar u soo wadin safarka dibadda. Ardayda waa in ay helaan ruqsad qoran si ay asxaabtaada fasalka u raacaan safarada dibadda. Kuma filna ruqsadda afka (sida telefoonka la diro). Ardayda aan haysanin ruqsad qoran waxay ku hari doonaan dugsiga. Haddii ardayga la yimaado dabeecad xumo inta lagu dhex jiro safarka dibadda, waxaa dhici karto in macalinka waco agaasimaha kaddibna ardayga dib loogu soo celiyo dugsiga. Looma ogola ardayda in ay ka qeybgalaan safarada dibadda mustaqbalka haddii aan ballan qaadin in dabeecadda noocaas aysan dhici doonin. Haddii dabeecad xumada sii socoto, ardayga waxaa loo ogolaan doonaa in uu ka qeybgalo safarada dibadda haddii uu la socdo waalid ama qof uu waalidka soo magacaabay.